XAFIISKA AGAASIMAHA
Kate Brown, Gubanatooraha ama Badhasaabka

Oregon Health Authority

500 Summer St NE E20
Salem OR 97301
Codka: 503-947-2340
Faakiska: 503-947-2341

Goobta Takoor La'aanta Tallaalka COVID-19, Helitaanka ADA iyo Luuqada

Taariikhda Dhaqangalka: Maarso 24, 2021

Maamulka: ORS 431A.010, ORS 431A.015, ORS 433.441, ORS 433.443, ORS 659A.142, ORS 659A.143, ORS 659A.403

Khusaynta: Sharuudaha iyo tallooyinka ku jiro dokumintigaan wuxay khuseeyaan qof kasta ee ka howlgalayo goobta tallaalka si loo bixiyo isticmaalka degdega ah ee la ansixiyay ama tallaalka COVID-19 ay FDA ansixisay ee Oregon.

Qeexitaano: Ujeedooyinka hagistan dartood, qeexitaanada soo socda ayaa laga yaabaa in lagu dabaqo:

- **ADA** waxaa loola jeedaa Xeerka Ameerikaanka Curyaanka ah
- **ASL** waxaa loola jeedaa Luuqada Dhagoolaha Ameerikaanka
- **LEP** waxaa loola jeedaa aqoonta Ingiriiska xadidan
- **Goobta maamulka tallaalka** waxaa loola jeedaa goob walba meesha isticmaalka degdega ah ee la ogolaaday ama tallaalka COVID-19 ee ay FDA ansixiyeen lagu bixiyo.

Hordhaca

COVID-19 waxay si weyn u saameysay Umadaha Qabiilka, bulshooyinka Qabiilka, Latino, Latina/Latinx, Ameerikaanka Madowga/Afrikaanka, Aasiyaan, Jasiirada Baasifiga iyo dadyowga Hindida Ameerikaanka/Alaska Dhalad ah, bulshooyinka midibka, dadka waayeelka iyo dadka qabo naafonimada. U hogaansanaanta sharciyada ka soo horjeedo-takoorida iyo Xeerka Ameerikaanka Naafonimada (ADA) waa sharciga, oo si gaar ah ayay muhiim u tahay in howlwadeenada goobaha bixinta tallaalka ay hubiyaan inaysan jirin caqabdo oo helitaanka tallaalada COVID-19 ee bulshooyinka midibka, Dadka dhagoolka, DhagoolCamoolaha, dadka curyaanka ah, iyo dadka qabo aqoonta Ingiriiska xadidan (LEP). Tallaalada waa in lagu bixiyaa hab xaqiijinaysa marin u helka oo waa in la siiyaa kuwa u qalma iyada oo aan jirin cunsuriyad ama takoorid.

Sharciga faderaalka iyo gobolka wuxuu ku laasimayaa takoor la'aan

Xafiiska faderaalka ee Xaquuqaha Rayidka ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadahana Mareykanka (HHS) waxay soo saartay hagitaan ee Maarso 28, 2020, oo xasuusinayo shirkadaha caymisan (bixiyayaasha daryeelka caafimaadka iyo caymiyayaasha caafimaadka) ee waajibaadyadooda sharciga faderaalka iyo masuuliyada sida waafaqsan Qeybta 1557 ee Xeerka Daryeelka La goyn karo iyo Qeybta 504 ee Xeerka Dhaqancelinta

kaas oo “mamnuuco takoorida ku saleysan jinsiga, midibka, asalka dhalashada, curyaannimada, da’da, sinjiga, iyo ku dhaqmida damiirka iyo diinta ee barnaamijyada ay maalgeliyeen-HHS.” HHS waxay ku celcelisay inaysan jirin takoorid “ee dadaalka Qaranka ee looga tallaalayo dadweynaha fayraska COVID-19 iyada oo aan laga eegin jinsiyada, midibka, asalka dhalashada, naafonimada, jinsiga, da’da, ama sinjiga.”[1]

Xiliga Abriil 2, 2021, HHS waxay soo saartay bayaan la cusbooneysiiyay ee ku saabsan hubinta helitaanka daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan tallaalada, ee dadka qabo curyaannimada. Si aad u aqrisid bayaanka, tag:https://www.justice.gov/opa/pr/statement-principal-deputy-assistant-attorney-general-civil-rights-leading-coordinated-civil.

Gudaha Oregon dhammaan dadka waxay “xaq u leeyihiin hoy buuxo oo simman, faa’idooyinka, xarumaha, iyo mudnaanada meel walba ee hoyga dadweynaha, iyada oo aan jirin wax kala soocid ah ku saleysan, takoorid ama xakameyn oo sababta jinsiyada, midibka, diinta, jinsiga, dooqa galmada, asalka dhalashada, heerka guurka ama da’da”. ORS 659A.403. Goob walba ee bixineyso tallaalada COVID-19 waa meesha hoyga dadweynaha iyo sidaas darteed waa inay hubiyaan in qof walba ee u qalma tallaalka helo helitaan simman oo goobta tallaalka.

U hogaansanaanta sharciyada curyaannimada

Sida kor ku xusan, goob walba ee bixineyso tallaalka COVID-19 waxaa loo tixgeliyaa meel hoyga dadweynaha iyo sidaas darteed waa inay u hogaansamaan Xeerka Ameerikaanka Curyaanka ah (ADA). Sida waafaqsan ADA, meel hoyga dadweynaha ah waa inay siisaa hoy macquul ah kuwa curyaanka ah, illaamaa sameynta sidaas ay sababeyso dhibaato weyn ama qarashaad. Goobaha tallaalka COVID-19 waa inay filataa inay u diyaar ahaato siinta tallaalada dadka naafada ah, oo ay ku jiraan koriyaanka jirka, garashada, cilmi nafsiga, iyo naafanimada aan muuqan.

Gudaha Oregon, waxay u tahay sharci daro meel walba oo hoyga dadweynaha ama qof walba ee matalayo matalaada meel noocaas ah, si loo kala sooco, loo takooro ama loo abuuro caqabado sababtoo ah macmiilka ama taageeraha waa shaqsi naafa ah. ORS 659A.142.

U hogaansanaanta sharciyada helitaanka luuqada

Goobta maamulka tallaalka ee helayo maalgelin walba oo faderaalka ah[2] waa inuu u hogaansamaa Ciwaanka VI ee Xeerka Xaquuqaha Rayidka.[3] HHS waxay sameysay bayaanka ku celcelinayo muhiimada lagu bixinayo warbixin la xiriirto COVID-19 ee luuqadaha aan ka aheyn Ingiriis:

> Tirooyin badan oo dadka Mareykanka ma aqriyaan ama uma fahmaan Ingiriis si wanaagsan. * * * Fariimaha dadweynaha faderaalka, gobolka, iyo deegaanka ee ku saabsan tallaabooyinka badqabka cudurka safmarka iyo dadaalada ka soo kabsiga waa

---

[1] https://www.hhs.gov/civil-rights/for-providers/civil-rights-covid19/index.html.

[2] Bixiyaha ka qeybqaadanayo barnaamijyada Medicaid ama Medicare waxaa loo tixgeliyaa helitaanka lacagaha faderaalka oo ujeedooyinka Ciwaanka VI. Intaas waxaa dheer, shirkad walba ee heleyso maalgelinta la xiriirto COVID-19 ee ka imaaneyso Maamulka Caafimaadka Oregon waxay ahaanayaan helaha lacagaha faderaalka iyo sidaas darteed waxay quseysaa Ciwaanka VI maadaama isha lacagahaas ay faderaalka yihiin.

[3] 42 U.S.C. § 2000d. Luuqada waxaa loo tixgeliyaa qeyb ka mid ah Asalka Dhalashada oo ujeedooyinka Ciwaanka VI.

in lagu bixiyaa diyaarin balaaran oo luuqadaha ay ku hadlaan dadka leh aqoonta Ingiriiska xadidan. * * * Ciwaanka VI wuxuu uga baahanyahay helayaasha caawinta dhaqaalaha Faderaalka inay bixiyaan helitaan wax ku ool ah ee barnaamijyada faderaal ahaan loo maalgeliyay iyo howlaha dadka leh aqoonta Ingiriiska xadidan.[4]

Sida waafaqsan Ciwaanka VI, helayaasha lacagaha faderaalka waxaa looga baahanyahay inay sheegaan, waafaqsanaadaan ujeedooyinka muhiimka ah ee barnaamijyada faderaalka caawiyay ama howlaha, baahiyada luuqada gaarka ah ee ka faa'ideystayaasha LEP taas oo haddii kale ahaaneyso xadeyno macmal ah ee ka qeybqaadasho buuxdo iyo wax ku ool barnaamijka ama howsha faderaalka caawiyay. Tani waxay u baahantahay in goobaha maamulka talaalka qiimeyso sida awooda qofka LEP ku fahmayo warbixinta hadalka iyo mida qoran ee ay bixiyaan iyo ku saabsan adeegyada tallaalka oo kaliya ah af Ingiriis waxay si weyn u saameyn kartaa awoodooda ay si buuxdo uga qeybqaataan ama uga faa'idaan adeegyada. Goobta maamulka tallaalka waa inay qiimeeyaan sida awooda qofka ku fahmayo warbixinta oo ku bilaabaneyso xogta sida loo balansado balanta tallaalka, ee boorka goobta tallaalka, warbixinta ku saabsan tallaalka iyo maamulkeeda, sida ku saleysan LEP, waxay saameyneysaa awoodooda iyo rabitaanka lagu helayo tallaalka COVID-19. Sida ku saleysan qiimeynta, nidaamyada waa in la hormariyaa oo la fulliyaa si loogu bixiyo warbixinta qaabab kale iyo luuqadaha aan Ingiriiska aheyn.

Hoyga loogu tallogalay dadka naafada ah

Si markaas loogu hogaansamo sharciyada kor lagu xusay, goobta howlwadeenka maamulka tallaalka waa inay:

- Inay lahaadaan xeerarka iyo nidaamyada sheegayo sida goobta ugu adeegeyso dadka curyaanka ah, oo ay ku jiraan laakin kuma xadidna:
  - Sida goobta u xiriirneyso si wax ku ool ah dadka naafada ah (tusaale ahaan, naafada jirka, hormarka, garashada, cilmi nafsiga iyo naafada aan muuqan);
  - Nidaamka lagu helayo, looga jawaabayo, oo qorayo cabashooyinka ADA;
  - Sida goobta ugu adeegdeyso shaqsiyaadka ee aanan xiran karin waji daboolashada ama maaskaraha sabab la xiriirto curyaannimada; iyo
  - Aqoonsashada qofka masuulka ka ah hubinta u hogaansanaanta xeerarka iyo nidaamyada ee ah in lasiiyo OHA markii la codsado.
- Lahow goob jir ahaan ay tagi karaan dadka naafada ah.
- Sii musqulo waafaqsan ADA.
- Sii baakinka ADA ee la geli karo.
- U dhaji aastaamaha daabacad balaaran leh, ee meelaha muuqata, oo wax ka badan hal luuqad ah, oo si cad u bandhigayo cida lagala xiriirayo arimaha helitaanka, iyo sida loola xiriiro iyaga.

[4] https://www.justice.gov/opa/pr/statement-principal-deputy-assistant-attorney-general-civil-rights-leading-coordinated-civil. Warbixin badan oo ku saabsan hubinta helitaanka luuqada iyo xoog saarida, iyo luuqadaha ay ku hadlaan, dadka leh aqoonta Ingiriiska xadidan ee bulsho gaar ah waxaa laga heli karaa https://www.lep.gov
iyo https://www.lep.gov/maps/.

- Lahow goob xiriiriyaha loogu tallogalay ee la heli karo oo ka jawaabi karo iyo xalin karo arimaha iyo su'aalaha la xiriiro helitaanka markay imaadaan.
    - Xiriiriyaha goobta waa inuu helaa tababarka wacyigelinta naafada si markaas loogu buuxiyo codsiyada hoyga si guul ah.
    - Dhammaan shaqaalaha goobta iyo tabarucayaasha waa inay ogaadaan sida loola xiriiro xiriiriyaha goobta.
- U oggolow shaqsiga inuu haysto xayawaan adeeg ah sida waafaqsan ORS
- 659A.143.
- Hubi in goobta maamulka tallaalka u hogaansantahay ADA, oo ay ku jiraan hubinta isgaarsiin wax ku ool ah oo bixinayo hoy macquul ah ee laga yaabo inay ku jiraato laakin kuma xadidna:
    - Lahaanshaha qoraalo fudud, luuqad-cad oo qoran ee loogu tallogalay shaqsiyaadka qabo naafonimada hormarka ama garashada ee ku fahmaa warbixin qoraal ahaan (sida lidka ku ah hadal ahaan).
    - Ku dhajinta aastaamaha daabacad balaaran oo dadka qabo aragga hoose.
    - Lahaanshaha qoraalada daabacad balaaran oo goobta oo dhan ah.
    - Siinta helitaanka ADA ee u ogolaado dadka qabo baahiyada dheeraadka ah oo ay ku jiraan dadka qabo curyaannimada caqliga iyo hormarka si ay u helaan adeegyo la dadajiyay oo la badelay.
    - Siinta waji daboolashada daaha furan shaqaalaha iyo xubnaha dadweynaha si markaas shaqsiyaadkaas ku aqriyaa faruuraha ay si wax ku ool ah ugu xiriiraan.
    - Caawin siinta helayaasha tallaallka ee camoolaha ah, Dhagoolka-Camoolaha, ama naafonimada kale ee la xiriirto aragga si loo hubiyo inay heli karaan warbixinta qoran.
    - Siinta xiriir hadal ama dooqyo kale ee loogu tallogalay shaqsiyaadka dhibaato ku qabo hadalka.
    - Siinta taageerada fasiraada goobta ama fogaanta oo Luuqada dhagoolaha Ameerikaanka ah (ASL) iyo luuqadaha kale.
    - Lahaanshaha goobaha dajinta iyo qaadista oo badqabka ah iyo la tagi karo.
    - Sii iftiinka yar ee loogu tallogalay iyo aagaga arimaha gaarka oo dagan ee loogu tallogalay shaqsiyaadka u baahan nasiiyooyinka dareenka.
    - Si firfircoon ah u weydii qof walba ee ka qeybgalayo goobta tallaalka, "Ma u baahantahay adeega fasiraada ama hoy aad ku heshid tallaalkaaga maanta?"

Helitaanka luuqada

Howlwadeenka goobta maamulka tallaalka waa inay:

- Sida ay u baahan tahay dowladda federaalka,siiyaan shaqsiyaadka ama wakiiladooda daryeelka caafimaadka ee sharci ahaan loogu ansixiyay Xaanshida Warbixinta ee loogu tallogalay Helayaasha iyo Daryeelayaasha ee tallaalka gaarka ah ee luuqadooda koowaad. Xaanshiyaha warbixinta waxaa laga heli karaa websaydka FDA: https://www.fda.gov/emergency-preparedness-and-response/coronavirus-disease-2019-covid-19/covid-19-vaccines.

Si markaas loogu hogaansamo sharciyada kor lagu xusay, goobta howlwadeenka maamulka tallaalka waa inay:

- Inay lahaadaan xeerarka iyo nidaamyada sheegayo sida goobta ugu adeegeyso dadka qaba LEP, oo ay ku jiraan laakin kuma xadidna:
  - Sida goobta ula xiriiri doontaa si wax ku ool ah dadka leh LEP;
  - Nidaamka lagu helayo, looga jawaabayo, oo qoreyso cabashooyinka helitaanka luuqada taas oo ah in la siiyo OHA markii la codsado; iyo
  - Aqoonsashada qofka masuulka ka ah hubinta u hogaansanaanta xeerarka iyo nidaamyada ee ah in lasiiyo OHA markii la codsado.
- U dhaji aastaamaha daabacad balaaran leh, ee meelaha muuqata, oo wax ka badan hal luuqad ah, oo si cad u bandhigayo cida lagala xiriirayo arimaha helitaanka luuqada, iyo sida loola xiriiro iyaga.
- Lahow goob xiriiriyaha loogu tallogalay ee la heli karo oo ka jawaabi karo iyo xalin karo arimaha iyo su'aalaha la xiriiro helitaanka luuqada markii ay imaadaan.
  - Xiriiriyaha goobta waa inuu garanayo oo ka waaya arag qaato isticmaalida adeegyada fasiraada.
  - Dhammaan shaqaalaha goobta iyo tabarucayaasha waa inay ogaadaan sida loola xiriiro xiriiriyaha goobta.
- Ku sii warbixinta iyo aastaamaha luuqado aan ka aheyn Ingiriis oo luuqadaha baahsan ee aan Igiriiska aheyn ee aaga adeega.
- Sii shaqsiyaadka ama wakiiladooda daryeelka caafimaadka sharci ahaan loogu ansixiyay oo ay la jiraan adeegyada fasiraada degdega.
  - Siinta adeegyada fasiraada qof ahaanta ah waa qaabka la doorbiday, laakin fasiraada waxaa ku jiri karo helitaanka qaabka taleefonka ama leenka luuqada fiidiyaha ee loogu tallogalay dadka qaba aqoonta Ingiriiska xadidan, si loo hubiyo in dhammaan warbixinta la bixiyay in lagu heli karo luuqada koowaad ee shaqsiga, oo ay ku jiraan ASL haddii loo baahdo.
  - Howlwadeenada waa inaysan ugu tiirsanaanin kuwa xiggo oo adeegyada turjubaanka:
    - Google Translate ama qaababka aalada macmalka la midka ah; ama
    - Xubinta qoyska shaqsiga ama saaxibka.
- Hayso dhammaan dokumintiyada qoran oo si ku haboon loogu fasiray luuqadaha baahsan ee aan Ingiriiska aheyn ee aaga adeega.
- Hayso aastaanta helitaanka luuqada si ay ugu ogolaato shaqsiyaadka lagu codsanayo helitaanka luuqada ee goobaha xigto:
  - Albaabka (albaabada) goobta
  - Aaga dajinta
  - Aagaga diiwaangelinta
  - Aagaga "kulanka iyo salaanta"
  - Joogsiga gaariga / aaga sugitaanka

    - Aaga Tallaalka
    - Aaga Kormeerida Tallaalka Hore
- Sii aastaanta jaheynta ee luuqada baahsan ee aan Ingiriiska aheyn ee aaga adeega iyo/ama aastaamaha erayada.
- Hubi shaqaalaha luuqada badan waa la aqoonsan karaa iyo in dhammaan shaqaalaha ay la socdaan illaha luuqada goobta oo ay ku jiraan xubnaha shaqaalaha labada luuqad aqriyo iyo luuqadaha badan iyo dooqyada fasiraada onleenka iyo taleefonka.
- Weydii dhammaan ka qeybqaatayaasha “Ma u baahantahay adeega fasiraada ama hoy aad ku heshid tallaalkaaga maanta?”
- Hubi in dhammaan tabarucayaasha iyo shaqaalaha leeyihiin helitaan degdeg ah ee “Waan ku hadlaa” kaararka aqoonsiga iyo ogow sida loola xiriiro maamulka goobta.

kheyraadka

- Daryeelka caafimaadka iyo Waji Daboolashada: Yareynta Xadeynada Isgaarsiinta ee Dhagoolka iyo Bukaanada Ku adag Dhageysiga
- Tixgelinada Xaquuqaha Rayidka FEMA Inta lagu jiro Dadaalada Qeybinta Tallaalka COVID-19
- Hubinta Helitaanka Luuqada HHS iyo Isgaarsiinta Wax ku oolka ah Inta lagu jiro Jawaabta iyo Soo kabsiga: Liiska warbixinta ee Jawaabayaasha Degdega
- Hagida ADA ee loogu tallogalay Maareeyayaasha Degdega iyo Maamulada Caafimaadka Dadweynaha Deegaanka
- Kaararka Isgaarsiinta loogu tallogalay Dadka Aan Hadli Karin
- Siinta adeegyada ku haboon ee dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan inta lagu jiro xaalada degdega COVID-19 (Ee Bixiyayaasha Ka diiwaangashan CCOs iyo OHP)
- Helitaanka Naafonimada ee Qeybinta Tallaalka
- Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan xaquuqaha iyo masuuliyadaha sida waafaqsan ADA iyo Qeybta 504 ee Xeerka Dhaqancelinta (Qeybta 504) waxaad la xiriiri kartaa Leenka Warbixinta ADA ee 800-514-0301 (codka) ama 800- 514-0383 (TTY) ama boogo https://www.ada.gov/. Warbixinta dheeraadka ah ee quseyso waxaa laga heli karaa websaydka Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Mareykanka’ Xafiiska Xaquuqaha Rayidka’ https://www.hhs.gov/civil-rights/for-providers/civil-rights-covid19/.
- Si loo bilaabo aqoonsashada qaar ka mid ah luuqadaha caadiga ah ee looga hadlo aagaaga fadlan booqo App-ka Qariirada Luuqada LEP.GOV. Wixii warbixin sharaxan ee la xiriirto luuqadaha luugu hadlo bulshadaada tixgeli inaad kaashatid hay’adaha bulshada ku saleysan (CBOs) ee aagaaga. Illaha xogta luuqada dheeraadka ah waxaa ku jiri karo warbixin ka imaaneyso dugsiga degmada deegaanka, waaxda deegaankaaga ee xafiiska adeegyada aadanaha ama Hay'ada Daryeelka La xiriiriyay ee gobolkaaga.
- **Websaydka Tallaalka OHA COVID-19:**http://healthoregon.org/covidvaccin
- e
- **OHA COVID-19 en Español:**http://healthoregon.org/vacunacovid

Su’aalaha ama walaacyada?

Haddii aad qabtid su'aalo kale oo la xiriira tallaallada COVID-19, fadlan u dir su'aalahaaga mid ka mid ah kuwa soo socda, si OHA ay u caawin karto.

- Guud ahaan su’aalaha tallaalka: ORCOVID@211info.org
- Wixii caawin ee lagu helayo tallaal ama wixii warbixin guud, la xiriir: 211
- Diiwaangelinta bixiyaha tallaalka COVID-19: Vaccine.ProviderEnroll@dhsoha.state.or.us
- Wixii cabashooyin la xiriiro helitaanka tallaalka nagala soo xiriir covidvaccine.complaints@dhsoha.state.or.us, ama 877-642-0450 / 503-947-2346

Helitaanka dukumiintiga: Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriiska, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us